

Howlaha hal-abuurnimada leh

Dun rinjiyeynta

Dhex geli dun weelal aay ku jiraan rinji tempera ah. Rinjiga haka dasleeyo dunta, ama dunta ku rid warqad dusheed. Ku jiid warqadda gees ilaa gees si rinjiga uu u maro.


Daabacaada gacanta iyo cagta

Saabuun dareere ah ku qas rinji tempera ah; tan waxay fududeyneysaa in rinjiga uu si fudud u dhaqmo. Sheeygaas isku qasan ku shub weel aan qoto dheer lahayn oo u ogolow in ilmahaada uu gacantiisa iyo/ama cagtiisa geliyo rinjiga. Ka dibna uu ku daabaco warqado waaweyn. Saxan balaaran oo aay ku jiraan biyo saabuun leh iyo tuwaal agtaada ku heyso si aad dhaqso ugu nadiifiso.



Sawirada jeesada ee maalinta roobka da'ayo

Roobka marka uu da'o ka dib, dibadda u qaado jeeso midab leh oo u ogolow in ilmahaada uu sawir ku sameeyo dhinaca la maro ee jidka (sidewalk). Midabada aad ayeey u iftiimayaan jeesadana si fudud ayeey uga dhaqmeysaa.



Maxaa Loo Ciyaaraa?

Ciyaarta waayoaragnimo waxbarasho ayeey u tahay caruurta. Koritaanka ilmo walba ciyaarta waxay u tahay hab lagama maarmaan ah oo caalami ah. Ciyaarta waa shaqada ilmaha. Waxay u ogolaataa in ilmaha uu sahmiyo adduunka uu ku nool yahay kuna korayo.

Barnaamijyada ciyaaraha waxay siiyaan caruurta iyo dadka waaweynba fursad aay ku wada ciyaaraan deegaan amaan ah oo maskaxda ka shaqeysiya. Marka aay si wadajir ah wax-u-qabtaan, caruurta iyo dadka waaweyn mid walba midka kale howlahiisa ayaa soo jiita waxayna bartaan in aay isgaarsiin yeeshaan. Ciyaarta waxay kobcisaa koritaanka iyo wax-wadaagidda.

Qalabka caruurta ku ciyaarto waa aaladaha caruurta aay ku wanaajiyaan ciyaartooda iyo waxbarashadooda. Ma jiro hal qalab oo aay caruurta ku ciyaarto oo "sax" ah. Caruurta waxay u baahan yihiin qalab iyo sheeyo lagu ciyaaro oo noocyo kala duwan ah oo ku jaan-go'an heerka koritaankooda, daneyntooda iyo awooddooda. Waxay u baahan yihiin qalab-ciyaareed oo loogu talagalay maalmaha roobka da'ayo, kuwo loogu talagalay ciyaaraha firfircoon ee iyaga saaxiib-dood ee dibadda ah, kuwo maalmaha la xanuunsan yahay iyo qalab-ciyaareed oo lagu dhiirigeliyo wax-wadaagidda iyo wada-shaqeynta. Ka fikir baahida iyo danaha gaarka ah ee ilmahaada marka aad dooraneyso qalab(iisa/keeda) ciyaaraha.

Waraaqaha taxanaha ah ee "Maxaa Loo Ciyaaraa" waxay talo ka bixinayaan dhaqdhaqaaqyada ciyaareed ee loogu talagalay caruurta kooxaha da'eed ee soo socda:

0-6 bilood	2-3 sanno
6-12 bilood	3-4 sanno
1-2 sanno	4-5 sanno

Sicirada dalabyada jumlada waraaqahan (pamphlets), iyo daabacaadaha kale oo dhan, waxaa laga heli karaa FRP Canada



707 - 331 rue Cooper Street, Ottawa, ON K2P 0G5

(613) 237-7667	info@frp.ca
1-866-637-7226	www.frp.ca
1-866-6-FRPCAN	www.welcomehere.ca
(613) 237-8515	www.bienvenuechezvous.ca

Somali/Somalien

Maxaa Loo Ciyaaraa?

3-4 Sanno



Ciyaarta Waa...

- dhaqaaqa
- qoob-ka-ciyaaridda iyo heesidda
- wax-la-sameynta caruurta kale
- wax-wadaagidda
- wax-qabanqaabinta
- su'aalo weydiinta
- maskax-wax-ku-qabashada
- iska-dhigidda
- ciyaaridda ciyaaro fudud
- dhibaato xalinta



Qalabka-ciyaarta si taxadar ah u dooro, adigoo maskaxda ku haya heerka koritaanka ilmahaada.




Seddax iyo afar jirada waxay ka helaan in aay sameeyaan wax dhab u eg. Ilmahaada sii baakado cunto oo maran oo u ogolow in uu isku dayo in uu cunto soo gado. Dheryaha iyo maqliyada, wax buu ku "karin" karaa; alaabta

shaaha oo yar, wuxuu xaflad ugu sameyn karaa caruusadaha. Sawirka uu maskaxdiisa ku sameeyo, iyo dhar yar oo lagu labisto, ayaa u ogolaanaya inuu iska dhigo dadka uu jecel yahay. Qalabka lagu-ciyaaro ee xayawaanka iyo dadka ah ayaa ku dhiirigelinaya inuu jilo sheekooyinka uu jecel yahay.

Isticmaal kaararka sawirada si aad ugula ciyaarto ciyaaro la is-laheysiinayo ilmahaada. Sidoo kale waxaad isla-heysiin kartaa shaxanada, ssheeyada la-yaqaan, sida iskaal-sooyinka (socks). Ciyaarahan waxay dhiiha xusuusta.

Qalabka lagu ciyaaro ee hal qof wax ka badan isticmaali karaan markiiba waxay dhiirigeliyaan wax-wadaagidda iyo wax-wada-sameynta caruurta isku da'da ah. Tusaalooyinka kuwan waxaa ka mid ah baloogyada, qalabka tareenka, guryaha been-beenta ah, garaashyada been-beenta ah iyo xayawaano yaryar oo la soo ururiyey iyo "guri-beereed" laga sameeyey baakadda kabaha. Waxaad sidoo kale ka sameyn kartaa kushiin iyo qaboojiye baakadaha si aad kushiin lagu ciyaaro u sameeyso.



Ciyaaro fudud la ciyaar sida "Waxaan arkaa" oo soo jiita maskaxda ilmaha. Doorro sheey adiga iyo ilmahaada aad arki kartaan, ka dibna fikrad yar sii si ilmahaada uu u qiyaasi karo waxa aad dooratay. Fikradaada yar waxaad ku siin kartaa adigoo leh, "Waxaan indhahayga yaryar ku arkaa, wax" Marka ilmahaada uu sheego, markiisa ayuu dooranayaa sheeyga kuna siinayaa fikrad yar.

Ciyaaro firfircoon la ciyaar ilmahaada. Iska dhig in aad xayawaan tahay oo sida bisadda u soco, u xamaaro sida maska, sida raha u bood. Ilmahaada laga yaabee in uu diyaar u yahay isku dayo in uu bashkuleeti wado.



Ilmahaada wuxuu awood heli doonaa inuu sheeyada is barbardhigo oo uu garto weynaanta iyo yaraanta, xajmiga-balaaran iyo midka qafiifka ah faraqa u dhaxeeya. Waxay kaloo awood u yeelan doontaa in aay sheeyada ku kala saarto qaabka, xajmiga iyo midabka. Sii sheeyo aay kala saari karto, sida badhano (guluusyo), dhagxaan, qolfo iyo kuul. Laga yaabee in aay ku raaxeysato in aay kartoona kuunka qeybihiisa kala duwan ku kala saarto.

Isticmaalka baakadaha

- god laga dhex baxo u samee
- god la galo ama gidaar gabaad ah ka samee go'yaal duqoobay iyo bustayaal
- masrax been-been ah samee
- aqal caruusado samee
- sawir waji qof-majaajilo ah (clown), afka duleeli oo ku tuur kubado ama baco quruurax ku jiraan
- tareen ka samee adigoo isku xiraya dhowr baakado: baakadaha kabaha oo lagu riday caruusadaha, baakado waaweyn oo loogu talagalay caruurta in aay ku fariistaan

